Codsiga Agabka Waxbarasho ee Beddelka Kale ah - Habraaca

(codsiga waalidka ee ku aadan agabka waxbarashada la bedelay ee arday gaar ah)

1. Dugsi kasta iyo xafiiska maamulka dhexe ayaa gacanta ku hayn doona oo diyaarin doona foomamka codsiga. Dhammaan diidmooyinka rasmiga ah ee ku aadanwaxbarista waa in lagu sameeyaa foomkan.

2. Foomka Codsiga Agabka Waxbarasho ee Beddelka Kale ah waa in uu saxiixaa qofka ka cabanaya oo loo gudbiyaa Maamulaha ama wakiilka.

3. Toban (10) maalmood oo dugsi gudahooda laga bilaabo helitaanka “Codsiga Agabka Waxbarasho ee Beddelka Kale ah,” maamulaha dugsigu wuxuu dib u eegis ku sameyn doonaa codsiga waalidka ee qoraalka ah wuxuuna u jawaabi doonaa waalidka haddii beddelka kale ee tacliinta ee lasoo jeediyay loo arko inay ku habboon tahay natiijooyinka ardayga oo ay macquul tahay marka loo eego kheyraadka kale ee loo baahan yahay. Shaqaalaha dugsiga loogama baahna inay fuliyaan wax lagu xukmiyey inay yihiin qabanqaabo aan macquul u ahayn waxbarashada beddelka kale ah. Waalidka, masuulka, ama ardayga qaangaarka ah ayaa bixin kara waxbarashada beddelka kale ah. Guddiga dugsiga loogama baahna inuu bixiyo kharashka waxbarashada beddelka kale ah ee ay bixiyaan waalidka, masuulka ama ardayga qaangaarka ah. Shaqaalaha dugsigu waxa kale oo laga yaabaa inay soo jeediyaan agab waxbarasho oo beddel kale ah si wax looga qabto tabashada waalidka.

4. Haddii heshiis ay gaadhaan waalidka, masuulka ama ardayga qaangaadhka ah iyo maamulaha kaas oo ku saabsan nuxurka beddelka ah ee la bixinayo, heshiiskan waxaa lagu soo koobi doonaa qoraal ahaan foom loo yaqaano “Qorshaha Waxbarashada Beddelka u ah ee Dugsigu Bixiyo.” Foomkan waxaa buuxin doona macalinka iyo/ama maamulaha waxaana waalidiinta lagu siinayaa toban (10) maalmood gudahood ka dib marka heshiis la gaadho si loo bixiyo waxbarashada beddelka kale ah. Nuqullada qorshaha la ansixiyay waxaa la siin doonaa waalidka, masuulka, ama ardayga qaangaadhka ah iyo macalinka. Qorshaha waxa ku jiri doona habka uu macalimku u qiimaynayo oo uu ku cabirayo guusha waxbarashadda ardayga iyo tayada shaqada ardayga, iyo sidoo kale marka ardaygu looga baahan doono in uu si fiican u qabto natiijada ardayga isagoo isticmaalaya nuxurka beddelka kale ah. Qorshuhu waxaa la fulin doonaa iyada oo aysan jirin tacliin ama ciqaab kale oo ardayga la saarayo si loogu habeeyo waxbarashada bedelka kale ah.

5. Haddii arrintu weli tahay mid aan lagu xallinin heerka maamulaha, waalidka, masuulka, ama ardayga qaangaadhka ah ayaa racfaan ka qaadan kara kormeeraha guud toban (10) maalmood gudahood laga bilaabo maalinta la helo go'aanka qoraalka ah ee maamulaha ee ku saabsan waxbarashada beddelka kale ah ee la soo jeediyay. Kormeeraha guud dabadeed ayaa dib u eegis ku sameyn doona arrinta oo u gudbin doona go'aankiisa/go’aankeeda waalidka, masuulka ama ardayga qaan-gaadhka ah shan (5) maalmo dugsi gudahood ka dib markii la helo racfaanka qoraalka ah.

6. Haddii arrinta heerkan lagu xallin waayo, waalidka, masuulka ama ardayga qaangaadhka ah ayaa markaas racfaan u qaadan kara go'aanka kormeeraha guud ee dugsiyada. Kormeeraha guud waa inuu go'aankiisa/go’aankeeda ugu gudbiyaa qofka cabashada soo gudbiyey qoraa ahaan muddol shan (5) maalmood oo dugsi gudahood laga bilaabo maalinta rafcaanka la helo.

Haddii arrinta heerkan lagu xallin waayo, qofka cabashada soo gudbiyey waxa uu muddo toban (10) maalmood oo dugsi gudahood laga bilaabo helitaanka go'aanka maamulaha guud, qoraal ahaan codsan karaa dhageysi guddiga dugsigu hortooda.

Codsiga Agabka Waxbarashada Beddelka Kale ah

Waalidka Sharafta lahow, Masuulka, ama Ardayga Qaangaadh ahow: Tabashooyinkaagu waa noo muhiim anaga. Haddii aad qabto wax tabasho ah oo ku saabsan waxa ku jira agabka waxbarasho ee uu adeegsado dugsiga degmada, fadlan la hadal macalinka fasalka ama maamulaha. Wixi kheyraadka xarunta warbaahinta ah, fadlan la hadal khabiirka warbaahinta dhismaha. Haddii aadan si buuxda ugu qanacsanayn natiijada shirkan, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad buuxiso codsigan ah tallaabo lagu dabagalayo una gee maamulaha dhismaha. Waxaad heli doontaa jawaab qoraal ah muddo soddon (30) maalmood ah gudahood. Fadlan weydiiso maamulaha nuqul ka mid ah habraacyada Codsiga Agabka Waxbarashada Beddelka Kale ah. Tani waxay sharxaysaa hannaankeena loogu talagalay in wax looga qabto tabashada waalidka ee ku saabsan agabka waxbarida. Mahadsanid.

Magaca Waalidka/Masuulka_____ Magaca Canuga _____

_____ Fasalka & Dugsiga Canuga_____

Cinwaanka _____ Telefoonka _____

Wakiil ka ah: Iskii _____ Urur ama Koox_____

Koorsada/Maaddada Canuga _____ Macalinka Koorsada/Maaddada _____

Kheyraadka Su’aasha La Geliyey:

Qoraaga _____

Cinwaanka _____

Daabacaha/Soo saaraha _____ Taariikhda Xuquuqda Nuqulka _____

Nooca Agabka_____

Fadlan ka jawaab su'aalahan soo socda markaad akhrido, daalacato, ama dhegaysato agabka oo dhan. Macluumaadkan ayaa loo baahan yahay si codsigaaga loogu socodsiiyo wakhtiga ku habboon. Haddii meel ku filan aan la bixin, ku soo lifaaq xaashiyo dheeraad ah. Fadlan ku saxiix magacaaga lifaaq kasta oo dheeraad ah.

1. Ma eegtay, akhriday, ama ma dhagaysatay qoraalkan gabi ahaantiisa? _____
2. Maxaa ku jira maaddada oo aad diiddan tahay? (Fadlan si gaar ah u sheeg, soo xigo boggaga, fareemyada ku jira baniikolada filimada, taxanaha filimada, qaybo gaar ah oo muuqaal kamid ah, iwm.) _____

.

.

3. Maxaad ka aaminsan tahay inuu yahay hal-kudhigga ama ujeedada kheyraadkaas? _____

.

4. Maxaad u malaynaysaa inay noqon karto natiijada xun ee ka imaaneysa marka uu canugu isticmaalo kheyraadkaas?

Maxaad u malaynaysaa inay noqon karto natiijo wanaagsan? _____

5. Maxaa faallooyin ah oo ku saabsan kheyraadkan ayaad akhriday ama aragtay? (Fadlan ku soo lifaaq koobi haddii ay suurtagal tahay.) _____

6. Miyaad kala hadashay tabashadaada ku saabsan kheyraadkan macalinka ilmahaaga? ❑ Haa ❑ Maya

Taariikhda wadahadalkan: _____ Maxaa ka soo baxay wadahadalkan?_____

7. Maxaad ka codsanaysaa dugsiga iyo/ama maamulaha dhismaha inay sameeyaan, ka natiijo ahaan cabashadaada? Calaamadee dhammaan kuwa khuseeya:

- ❑ shir kala yeelashada macalinka iyo maamulaha
- ❑ wax ka beddelka meelaynta ilmahayga oo keliya
- ❑ uga cudurdaarka kaliya canugeyga oo looga cudurdaaro kheyraadkan
- ❑ wax uga beddelka meelaynta dhammaan carruurta
- ❑ uga cudurdaarka caruurta oo dhan oo looga cudurdaaro kheyraadkan
- ❑ tallaabo kale; fadlan sharax –

WAXAA BUUXINAYA MAAMULAHA

Tallaabada Maamulaha Dhismaha ee laga qaaday codsigan:

(Wakhtiga kama dambaysta ah ee waalidku waa toban (10) maalmood gudahooda wakhtiga helitaanka codsigan waalidka)

Faallooyinka maamulaha: _____

Taariikhda uu helay maamulaha: _____

Saxiixa _____

Taariikhda _____

og: Waalidka, Masuulka, ama Ardayga Qaangaadhka ah Kormeeraha Guud ee waxbarashada

Qorshaha Waxbarashada Beddelka Kale ah ee uu Dugsigu Bixiyo

(Qorshahan waa in uu dhamaystiraa oo uu saxiixaa maamulaha dhismaha ama xubin shaqaalaha ah ka dib marka uu shir la yeesho waalidiinta, kadib *Codsiga Agabka Waxbarashada Beddelka Kale ah - Habraaca)*

Waxa dhammaystiray (xubin ka tirsan shaqaalaha)

Dhismaha Taariikhda la siiyay waalidka

Magaca Waalidka/Masuulka_____

Ku lifaaq nuqulka la buuxiyey " *Codsiga Agabka Waxbarashada Beddel Kale ah,*" soo koobitaanka tabashooyinka iyo codsiyada waalidka. Magaca Canuga_____ Fasalka & Dugsiga

_____

Koorsada/Maaddada Canuga _____ Magaca Macalinka _____

1. Waa maxay natiijada ardayga ee loo baahan yahay in wax laga qabto? _____

2. Sharax agabka kale ee uu soo jeediyay (sax saar mid ama labbadaba): ☐Waalid ☐Dugsi

Qoraaga _____

Cinwaanka _____

Daabacaha/Soo saaraha _____ Taariikhda Xuquuqda Nuqulka _____

Nooca Agabka_____

3. Sidee beddelkan u isticmaali lahaayeen macalinka iyo ardaygu? _____

4. Habka qiimeynta macalinka ee la soo jeediyay ee ku saabsan tayada shaqada iyo heerka waxbarasho ee ardayda ee la gaadhay: _____

5. Waa maxay kharashaadka/adeegyada dheeraadka ah ee uu bixinayo waalidka?_____

6. Ardaygu ashyaadan xaga sare ku xusan taariikhdee ayuu dhammaystiri doonaa? _____

7. Qoraalada kale ee ku saabsan qorshahan: _____

Saxiixyada Ansixinta

Haa, qorshaha beddelka ah ee leh faallooyinka ku yaala bogga koowaad waxaa oggolaaday:

Waaliidka/Masuul_____ Taariikhda

_____

Ardayga_____ Taariikhda

_____

Macalinka _____ Taariikhda

_____

Maamulaha _____ Taariikhda

_____

Bayaanka Ku Guuldareysiga In La Xaliyo
Codsiyada Waalidka

Maya, qorshaha lasoo jeediyay **waxa aan** oggolaan:_____ marki ay ahayd _____.
(taariikhda)

Warqadan shaqo waxa loosii gudbiyay kormeeraha guud ee waxbarashada marki ay ahayd_____
(taariikhda)

waxaa gudbiyey_____

Maxay yihiin sababaha keenay khilaafkan? _____

_____

Maxaad ka codsanaysaa dugsiga inuu sameeyo? _____

_____

Saxiixa _____
(Waaliidka/Masuulka)

Telefoonka maalintii _____

Telefoonka guriga _____

Taariikhda _____

TALLAABADA UU KA QAADAY KORMEERAHA GUUD CODSIGAN

(Waa la dhammeeyay kaliya haddii waalidku rafcaan ka qaataan go'aanka sare.)

Waxaa Saxiixay

Taariikhda